

Arbaco, Agoosto 28, 2024

Waalidiinta iyo daryeelayaasha qiimaha leh

Re: \$400 Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus)

Qoysasku waxay markasta u doonayaan caruurtooda waxa wanagsan. Laakin qiimaha nolosha ee hadda jira - lebbiska, kaamamka, ciyaaraha iyo waxyabo kale oo badan - waxaas oo dhan marka la isku daro waa kharash.

Taasi waa sababta ay Dowladda Allan Labour ay nolosha ugu fududaynayso qoysaska, iyadoo siinaysa \$400 oo ah Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) taas oo ah wax hal mar keliya la bixiyo.

Arday kasta oo ka diiwaangashan dugsi dowlad oo Victoria ku yaal sannad dugsiyedka 2025 wuxuu heli doonaa \$400 oo taageero ah.

Waxay kaa caawin doontaa inay dabooshoo kharashka dharka dugsiga, buugaagta, iyo hawlaha dugsiga sida kaamamka, dalxiisyada iyo ciyaaraha.

Uma baahnid inaad dalbato.

Laga bilaabo Nofeembar 2024, waalidiinta iyo daryeelayaashu waxay imayl ka heli doonaan Waaxda Waxbarashada taas oo ay ku qoran tahay faahfaahin ku saabsan sida ay u heli karaan gunnada \$400.

\$400 Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) ayaa loo heli karaa caruurga oo dhan. Taas macneheedu waxa weeye qoyska haysta saddex carruur ah oo da'dii dugsiga gaadhay waxay heli doonaan wadar ahaan \$1,200.

Gunnada Keydka Dugsiga (School Saving Bonus) ayaa la heli karaa iyada oo ay usii dheertahay taageero maaliyadeed kale oo ay ku jiraan barnaamijka Labbiska Dugsiga ee La-awoodi-karo (Affordable School Uniforms program) iyo kaamamka, Ciyaaraha iyo Sanduuqa dalxiiska.

Si aad wax badan uga ogaato waxa \$400 lagu bixin karo, iyo taageerada kale ee la heli karo, booqo vic.gov.au/school-saving-bonus.

Dhamaanteen waxaanu leenahay qoysaskiina - nasiib wacan sannad dugsiyedka 2025.

Mahadsanid,

**Mudane. Jacinta Allan
Premier of Victoria
Hooyo laba caruur ah dhashay**

**Mudane. Xildhibaan Ben Carroll
Ku-xigeenka koowaad
Wasiirka waxbarashada**